



# Guurka Hore ee Khasabka ah

## Ku khasbida qof inuu guursado waa dembi khatar ah Australiya gudaheeda.

Australiya gudaheeda, dadku xor bay u yihiin inay guursadaan. Badanaa, qofku waa inuu ka weyn yahay **18 sanno** jir si uu si sharci ah ugu guursado. Xaaladaha qaarkood qof ka weyn da'da **16 sanno** wuxuu guursan karaa qof 18 sanno ka weyn, laakiinse tani waxay u baahan tahay amar maxkamadeed.

Waxay ka soo horjeedaa sharciga Australia inaad khasabto, u hanjabto ama khiyaameyso qofna si aad u guursato. Sidoo kale waxay ka soo horjeedaa sharciga inaad ku dhiirigeliso ama aad caawiso si loo qabanqaabiyo guur khasab ah, iyo inaad qayb ka noqoto guur khasab ah haddii aadan ahayn dhibanaha. Tani

Guurka la soo qalqaaliyo, halkaas oo ay labada qofba si xor ah isuguursadaan, wuu ka duwan yahay guurka xoogga ah. Guurka laysu soo qalqaaliyo sharci buu ka yahay Australiya gudaheeda.

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

## Waa sharci darro inaad ugu kaxeeyso ama ugu dirto qof dal kale guur xoog ah ama in qof kale kuu qabanqaabiyo taas.

Marmarka qaarkood dadka waxaa loo ka xeeyaa dibeda iyadoo aysan rabitaankooda ahayn ama waxaa lagu khiyaamaa dibed aadis si guur loogu khasbo. Tani sharciga ayey ka soo horjeedaa waxayna sababi kartaa xabsiyid.

## Miyaad adigu ama qof aad taqaan, khatar ku jirtaan?

Haddii addiga ama qofaad taqaanid uu khatar ku jiro ama u yahay guur hore ama Khasab ah, waxaad kala xiriiri kartaa **Australian Federal Police (AFP) 131 237(131AFP)** wixii caawimaad ah.

AFP waxay ku siin kartaa ammaan, oo ay ku siin kartaa tallada bilowga ah waxayna oo ay u gudbin kartaa adeegyada kale wixii caawimaad ah sida hoy, taageero lacageed, tallo sharciyeed iyo la tallin socdaalka. Wixii macluumaad dheeraad ah wuxuu ku yaal **website** ka **AFP** ee **www.afp.gov.au**.

## Waxaa jira adeegyo kale oo ku caawin kara Australiya gudaheeda.

**My Blue Sky** waa weeb saydhka qaran ee Australia iyo khadka wicitaanka ee loo gaar yeelay ka hortaga guurka khasabka ah, macluumaadka, gudbinada iyo talada sharciga ee bilaashka ah.

Wac **(02) 9514 8115**, fariin ugu dir **0481 070 844**, email **help@mybluesky.org.au**, ama gal **website** ka **My Blue Sky** ee ah **www.mybluesky.org.au**

**1800RESPECT** waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galmada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama kagal website ka **1800RESPECT** ah **www.1800RESPECT.org.au**.

## Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wacitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.

## Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan guurka khasabka ah

Gal **website** ka Wasaaradda **Arimaha Gudaha ee (Department of Home Affairs)** **[www.homeaffairs.gov.au](http://www.homeaffairs.gov.au)** oo baar “guurka khasabka ah” (“forced marriage”).